



Casriyeynta Madison



Tilmaamaha Casriyeynta

2021-ka, Dugsiga Sare ee Madison, ee sida buuxda loo casriyeyay ee qiyaastiisu dhan tahay 292,000 square foot ee ayaa dib u furmi doona isaga oo leh awood uu ku qaado 1,700 oo arday. Jawiga waxbarasho ee qarniga 21^{aad} wuxuu u adeegi doonaa bulshada ardayda ah ee dhaqamada kala duwan leh oo ku hadla in ka badan 30 luqadood.

Dadaalada qorshe iyo naqshad dejin oo sanado badan socday ayaa lagu soo ururiyey fikradaha boqolaa shaqaale, arday iyo daneeyayaasha bulshada iyada oo la adeegsanayo kulamo dadweyne oo taxane ah iyo seminaaro dhanka isdhixgalka ah oo gacmaha laga qabanayo. Casriyeynta Madison waxaa ka mid noqon doona in ka badan 170,000 square feet oo ah dhismo cusub, oo ay ku jiraan masrax, goobaha dadka ka dhexeeyay iyo goobta jimicsiga taasi oo si aan kala go'lahayn ay iskugu dhafnaan doonaan dhismaha casriga ah-kuwa qarniga dhexdiisa la dhisay ee taariikhiga ah.



Macluumaadkii U dambeeyay

Website-ka Casriyeynta Madison: <http://MadisonBond.pps.net>

Wakhtiga loo qabtay Mashruuca

GU'GA 2016 – GU'GA 2019

Qorsheynta & Naqshadda

Qorshaha Weyn / Qaabeynta Naqshadda / Horumarinta Naqshadeynta / Dokumentiyada Dhismaha

XAGAAGA 2019 – XAGAAGA 2021

Dhismaha

Bulshada Madison waxay u guuri doontaa Xarunta Marshall kaasi oo loogu talagalay sanad dugsiyeediyada 2019-20 iyo 2020-21.

DAYRTA 2021

Dugsiga Madison ee sida buuxda loo casriyeyay ayaa furmaya

Kafateeriyada / Goobaha dadka ka dhexeeyay iyo Hoolka Furan ee La iskaga gudbo

Goobaha dadka ka dhexeeyay waxay noqon doonaan xudunka dugsiga la casriyeyay waxayna u shaqeyn doonaan meel soo dhawayneed oo ku taala albaabka laga soo galo. Hoolka Furan ee La iskaga gudbo wuxuu isku xiri doonaa qaybaha waaweyn ee dugsiga iyo dhammaan dabaqyada saddexda fasal.

Qaybta Sayniska

Shaybaarada saynisku waxaa la iskugu keeni doonaa meel u dhow dhinaca hore ee dugsiga iyaga oo noqon doona meel soo jiidasho leh oo tusaale iftiimaya u leh dugsiga Madison ee cusub.

Bandhiga Fanka

Xarunta muusikada & masraxa cusub, ee casriga ah waxay u adeegi doonaan dugsiga iyo bulshada degaanka.

Ilaha Bulshada



Xarunta daryeelka carruurta, xarunta caafimaadka dadweynaha, iyo goobta cuntada ee bulshada waxay sii wadi doonaan in ay u adeegaan bulshada.

Xarumaha Ciyaaraaha

Dhismaha cusub ee goobta jimicsiga waxaa ka mid noqon doona goobta jimicsiga rasmiga oo leh 1,700 kursi, goobta jimicsiga dheeraadka ah, qolka jimicsiga, qolka lagdinta/ qoob ka cayaarka iyo garoonka softball-ka oo cusub oo goobta ku yaala.

Xirfadaha Farsamada Waxbarashada CTE

Ardayda ka tirsan dugsiga la casriyeyay ee Madison waxay heli doonaan shaybaaro gaar ah oo loogu talagalay naqshadaynta dhijitalka ah, injineernimada, cilmiga luqadda kambiyutarka, farshaxanka dhijitalka ah, sayniska caafimaadka/bayolajiga, farsamo farshaxan, dhismaha, iyo beeraha joogtada ah, intaasi waxaa dheer meel wax lagu sameeyo oo cusub.



MUSTAQBALKEEDA SI WADAJIR AH U DHISAYNA.

<http://MadisonBond.pps.net> • MHSmod@pps.net • 503-916-2222

[f www.facebook.com/PPSMadisonHighSchool](https://www.facebook.com/PPSMadisonHighSchool) [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Portland Public Schools
School Building Improvement Bond



Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.